

Dhammaan wax kasta ee ku saabsan Dhimista Kharash-Wadaagga

Kharashka Hooseeya Wuxuu Lacag Ku Reebaa Jeebabkaaga



WAA MAXAY DHIMISTA KHARASH-WADAAGGA?

Dhimista kharash-wadaagga ayaa hoos u dhigeysa kharashka aad jeebkaaga ka bixiso ee qorshahaaga caafimaadka (waxyaabaha laga jari karo, lacag-bixinnada la wadaago iyo caymiska la wadaago). Hoos uma dhigo lacagtaada caymiska ee sida joogtada ah loo bixiyo. Waxaad keliya heli kartaa iyadoo loo marayo *Washington Healthplanfinder*.

SIDEEN KU HELAA DHIMISTA KHARASH-WADAAGGA?

Waxaad xaq u yeelanaysaa dhimista kharash-wadaagga iyadoo lagu saleynayo dakhligaaga. Sida uu u hooseeyo kharashkaaga, waa sida ay u badan tahay in aad dhaqaaleyn karto. Waxaa in aad isku diiwaangelisaa qorshaha Silver si aad u hesho dhimista kharash-wadaagga.

SIDEE AYUU U SHAQEEYAA DHIMISTA KHARASH-WADAAGGA?

Waxay hoos u dhigaan waxyaabaha lagaa jari karo. Marka aad leedahay waxyaabo lagaa jari karo oo hooseeya, qorshahaaga caafimaadka ayaa sida ugu dhakhsiyaha badan ah u bilaabi doonna wadaagista kharashka.

Waxay hoos u dhigayaan lacag-bixinnadaada la wadaago iyo caymiska-la-wadaago. Waxaad bixinaysaa lacag-bixinnada la wadaago iyo lacagaha caymiska-la-wadaago marka aad hesho adeeg la caymiyey. Dhimista kharash-wadaagga ayaa hoos u dhigta qaddaradan.

Waxay hoos u dhigayaan kharashka ugu badan ee aad jeebkaaga ka bixinayso. Kharashka ugu badan ee aad jeebkaaga ka bixinayso ayaa xaddidaya waxa aad ku bixinayso daryeelka caafimaadka ee sannadkii. Adeegyada la caymiyay ma lahan kharash jeebka laga bixiyo marka aad xadkan gaarto.

TAAGEERO HEL HADDII AAD U BAAHAN TAHAY



Naga soo wac
1-855-923-4633



Nagu soo booqo
wahealthplanfinder.org



Soo-degso app-ka
WAPlanfinder

wahealthplanfinder.org
1-855-WAFINDER | 1-855-923-4633

 **washington
healthplanfinder**
click. compare. covered.